

Tusmada Buugga

Mashruuca Tamarta Africa	1
Daah_furkamashruucaTamartaqoraxdaeeDegmadaBerbera.....	2
MashruucaCusboonaysiintakorantadaTamartaeeCeerigaabo.....	3
AgaasimahaGuudOobooqdayKorantadaTamartaeeCeerigaabo.....	4
Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta oo ka hir gelisay Cusbitaalka Laascaanood Adeeg Koronto oo lagu najaxay	5
Tartanka Mashruuca Aagga Tamarta Ee Baanka Aduunka (Seap)	6
Cilmi baadhista Tamar dhaliyaha Dhulka hoose.....	7
DaahfurkasahanmacdaneedoolagafuliyeyGobolkaSaaxil.....	8
WasiirkaMacdanta oo so af-jaray Khilaafka Degmada Fiqi_Ayuub.....	9
AgaasimahaGuudoosoAf-jarayKhilaafkaShirkadaXididMadow.....	10
Waaxda Shidaalka iyo Geedi Socodka Hawlaha Shidaalka.	11
Golaha Wakiilada oo Ansixiyey xeerka Soo-saaridda Shidaalka.....	12
Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta Oo xilka la wareegay.	13
Kulan isbarasho oo Dhex maray wasiirka iyo Agaasime-waxeedyadda.	14
WaaxdaCududaShaqaalaha.....	15
AbaalmarintaShaqaalaha.....	16
ShirkaMadaxdaWasaaraddaiyoShaqaalaha.....	17
Dhiirigelinta Ganacsadda Dahabka.....	18
Safarkii Wasiirka Ee Dubai.....	19
WaaxdaQorshaynta.....	20
WaaxdaMaamulkaiyoMaaliyada.....	21
Waaxda X/Dadwaynaha Iyo saxaafadda.	22

WEEDHA AGAASIMAHA GUUD



Himiladda Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Somaliland nuxurkeedu waa kor u qaadista Tayadda Noloshu qof kasta oo ku nool deeganadda Somaliland, ka dhabaynta iyo hir gelinta Himiladaasi waxay ku imanaysaa in bulshadu si wada jir ah u fahanto inuu qaran kastaa ku horumaro sida toogan ee uu uga faa'idaysto khayraad kiisa dabiiciga ah.

Sidoo kale Hiigsiga wasaaradda Tamarta iyo Macdantu waa in ay gacan laxaad le ka gaysato koboca dhaqan_Dhaqaale Ee bulshada Somaliland iyada oo loo marayo in si waarta looga faa'idaysto khayraadka dalka Macdanta, tamarta iyo shidaalka

wasaradda tamarta iyo macdantu waxay ka shaqaysaa dajinta, hagidda iyo hirgalinta himiladda dawladda Somaliland ee la xidhiidha tamarta, macdanta iyo shidaalka iyada oo loo marayo dajinta iyo fullinta siyaasadaha istiraatiijiyadaha iyo mashaaricda fududaynaya in laga midha

dhaliyo habsami u adeegsiga khayraadkaasi, iyadoo lala kaashanayo qaybaha kala duwan ee xukuumadda iyo daneeyayaasha kale ee Tamarta, Macdanta iyo Shidaalka.

Sidaa darteed Somaliland waxay asaastay isla markaana qorshaysay daah furnaan ku haboon soo jiidashada maal gashadayaal iyo daneeyayaasha horumarineed.

Hanaanka geedi socodka safarkani wuxuu samayn ku yeelan doonaa helitaanka kaydada macdaneed ee baxada wayn iyo Tamar jaban oo inagu filan lana aboodi karo.

Mukhtar Maxamed Cali
Agaasimaha Guud Ee
Wasaaradda Tamarta iyo
Macdanta

XUKUUMADDA SOMALILAND OO DAAH-FURTAY MASHRUUCA TAMARTA AFRIKA OO AY DAWLADDA MARAYKANKU MAAL-GELINAYSO

Shaacinta bilowga Mashruuca POWER AFRICA iyo fursadaha ku jira

Hargeysa(WT&M)-Xukuumadda Somaliland iyo Shirkadda R.T.I ayaa ku dhawaaqay in dalka laga bilaabi doono fulinta mashruuca Power Africa oo ah mid lagu tayeynayo, tababaro la xidhiidha adeeg-bixinta Korantada oo la siin doono Shirkaddaha maamula Korantada dalka iyo laamaha dawliga ah ee doorka ku leh horumarinta Tamarta Qaranka. Kulanka qaabilaada Weftiga ka socda



laguna balaadhinayo hanaanka Tamarta Korantada Somaliland, kaasoo ah mashruuc heer Gobol iyo qaaraddeed ah oo la xidhiidha Iskaashiga iyo is-dhexgalka dhinaca Tamarta ee wadamada Afrika, Isla markaana ay maal-gelinayso Hay'adda Dalka Maraykanka u qaabilsan Mucaawimooyinka ee USAID.

Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta Jamhuuriyadda Somaliland Md. Cabdilaahi Faarax Cabdi oo uu weheliyo Agaasimaha guud ee Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta Mukhtar Maxamed Cali, ayaa xarunta Wasaaradda ku qaabilay masuuliyiin ka socda Shirkadda R.T.I oo fulinaysa mashruuca Power Africa 23 October 2021.

Masuuliyiinta ka socda Shirkadda R.T.I oo dalka u yimi bilowga fulinta mashruucan lagu kobcinayo adeegyada Tamarta Somaliland ayaa muddo joogay dalka, iyagoo bixinaya

Shirkadda RTI waxa Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta Md. Cabdilaahi Faarax Cabdi ku wehelinayey Agaasimaha guud ee Wasaaradda Md. Mukhtar Maxamed Cali, Agaasimaha Waaxda Tamarta ee Wasaaradda Liibaan Xaaji Maxamuud Warfaa iyo masuuliyiin kale.



Md. Cabdilaahi Faarax Cabdi Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta Somaliland iyo Richard Morison oo ka

socday Shirkadda RTI ee Somaliland ka fulinaysa mashruuca Power Africa oo shir-jaraa'id ku qabtay Xarunta Wasaaradda, ayaa shaaciyey in si rasmi ah dalka looga bilaabi doono mashruucan, iyadoo laga duulayo heshiisyadii hore loogu balamay barmaamujkan fulintiisa.

Tamartu waa dhiigga Dalka haddaanu Tamar lahayna awood ma yeellanayo, wershado waaweyn ma yeellan karo. markaa mashruucani waa mid aad u wanaagsan"

Richard Morison oo isaguna halkaasi ka hadlay ayaa faahfaahin ka bixiyey muhiimada



“Mashruucu wuxuu khuseeyaa horumarinta tamarta waddankeena iyo isku-xidhka wadamada deriskeena sidii loo balaysimi lahaa ee dhinac tamarta aynu isugu xidhmi lahayn wadamada deriskeena qaybtiisa hore taasi qaabilsan tahay”ayuu yidhi Wasiirka Macdanta iyo Tamarta Cabdilaahi Faarax Cabdi oo ugu horayn shirka-jaraa'id ka hadlay.

Mashruucan waxa uu ka kooban yahay laba qaybood, sida uu wasiirku sii sharaxay “qaybta dambena waxay noqonaysaa inay innaga gudaheena (Somaliland) innagala shaqeeyaan horumarinta Tamarteena, hadday tahay farsamo, hadday tahay tayeyn, aqoon-korodhsi iyo hadday tahay kaabeyaashaba iyo wax kasta oo lagu horumarinayo Tamarta.

mashruucani “mashruucan tamarta Afrika (Power Africa) waa barnaamuj ay maalgeliso Dawladda Maraykanku oo dhinaca adeeg-bixinta tamarta Korantada ah. waxaanu halkan u joognaa sidii aanu Dawladda iyo dadka Somaliland uga taageeri lahayn horumarinta adeeg-bixinta Korantada”ayuu yidhi Sarkaalka u hadlay Shirkadda R.T.I Richard Morison

Mashruuca Tamarta Afrika (Power Africa) ayaa ah barmaamuj lagu horumarinayo is-dhex-galka iyo wadaaga Tamarta ee wadamada Afrika, gaar ahaan dalalka Geeska Afrika, waxaanay ujeedadiisu tahay sidii ay wadamada gobolku isaga kaashan lahaayeen Khayraadka dhanka Tamarta.



BOOQASHADII BERBERA

Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Dadwaynaha iyo Saxaafadda Cabdifataax Macdanta Jamhuuriyadda Somaliland mire Nuur iyo Wefti heer caalami ah Md. Cabdilaahi Cabdi Faarax oo ay oo ka socda Hay'adda Maraykanka u wehelinayeen gudoomiyaha Komishanka qaabilsan kaalmooyinka ee USAID, ayaa Maamulka Tamarta Md. Axmed Faarax kormeeray Dekedda Berbera iyo mashruuca Cadare, Agaasimaha Waaxda Tamarta cusboonaysiinta tamarta ee magaladaasi. Liibaan Maxamed Agaasimaha xidhiidhka



Booqashada weftiga ee magaalada Berbera, ayaa ujeedadiisu ahayd inay u kuur-galaan mashaariicda horumarineed ee ka socda, waxaanay kulan la qaateen maamulka heer degmo iyo Gobol iyo masuuliyiinta xafiisyada laamaha dawladda ku leeyihiin Berbera.

Dhanka kale weftigu waxay booqdeen xarunta dab-dhalinta cadceeda (Solar system Energy) ee magaalada Berbera, halkaasoo kamida meelaha laga hirgeliyey mashaariicda guulaystay ee dhinaca Tamarta.

WASIIRKA TAMARTA IYO MACDANTA OO SOO XIDHAY DAAH-FURKA MASHRUUCA POWER AFRICA

Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Jamhuuriyadda Somaliland Md. Cabdilaahi Cabdi Faarax, ayaa soo xidhay kulan lagu daah-furay mashruuca tamarta iyo madax-qaybeedyada Wasaaradda tamarta iyo Macdanta, Saraakiisha Shirkadda Somaliland ka fulinaysa mashruuca oo magaceeda la yidhaahdo RTI iyo wakiilo ka socday Shirkaddaha maamula Korantada



Afrika (Power Africa) oo ah barmaamuj kor loogu qaadayo tayada adeegga korantada iyo aqoonta adeeg-bixiyeyaasha, isla markaana ujeedaddiisu tahay sidii ay Somaliland qayb uga noqon lahayd isdhexgalka iyo wadaagga Tamarta ee bariga Afrika iyo guud ahaan qaarada.

Kulankan oo muddo afar cisho ah ka socday Hudheelka Ambasadoor ee magaalada Hargeysa, waxa xidhitaankiisa ka soo qaybgalay Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Md. Cabdilaahi Cabdi Faarax, Guddoomiyaha Komishanka Tamarta qaranka Axmed Faarax Cadare, Wasiirka Wasaaradda Xidhiidhka goleyaasha iyo arrimaha dastuurka Md. Maxamed Xaaji Aadan, xubno kamida Agaasime-waaxeedyada, khubarrada

dalka.

kulanka ayaa maalmaha uu socday si qoto dheer loogu sharaxay ahmiyadda uu mashruucani u leeyahay Somaliland iyo guud ahaan faa'idooyinka ku lamaan mashruuca isdhexgalka iyo wadaagga Tamarta ee Power Africa, sidoo kalena soo bandhigay afkaar iyo aragtiyo la xidhiidha sida ugu fudud ee uu u fuli karo

Mashruuca Power Africa waxa maalgelinaysa Dawladda Maraykanka oo soo marisay Hay'adda USAID, waxaanu adeeg-bixiyeyaasha Waddaniga ah ee dalka ka caawinayaa aqoon iyo khibrad inay u yeeshaan Tamarta korantada.

XARUNTA TAMARTA QORRAXDA OO LAGA HIRGELIYAY MAGAALADA BERBERA



Berbera(WT&M)-Magaalada Berbera waxa laga daah-furay xarunta Mashruuca Tamarta Qorraxda ee Degmada Berbera 12/1/2021, taas oo uu maalgaliyay Sanduuqa Horumarinta Abu Dhabi (ADFD) ee dalka Isu-taga Imaaraadka Carabta.

Xarunta Tamarta Qorraxda oo xaddigeedu yahay 7MW, waxa lagu hirgaliyay muddo aad u kooban, si gacan looga gaysto harumarinta dalka, xilli dunida uu saameeyay xanuunka Coronavirus-ku, waxaana loogu tala galay in ay daboosho baahiyaha koronto ee bulshada degmada Berbera, oo lagu qiyaasi karo 50,000 oo qof. Xarunta waxa

lagu xidhay shabakadda dab wadaagta ee magaalada Berbera, si loola jaanqaado korodhka baahiyaha koronto ee degmada oo dhan.Mashruuca koronto dhalinta isku sidkan oo isbedel xooggan oo togan ku sameeyey qiimaha tacriifadda korontada Berbera, sidoo kalena ka qaybqaatay horumarka dhanka dhaqaalaha ee Magaaladaasi iyo guud ahaan dalka, waxa ku baxay 29.3 milyan.

Mashruuca waxa xadhiga ka jaray Madaxwayne ku Xigeenka JSL Mudane. Cabdiraxmaan Cabdillaahi Ismaaciil, waxaana xaflada furitaanka ku wehelinayey

Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta JSL



oo markaa uu ahaa Mudane Jaamac Xaaji Maxamuud Cigaal, Wasiirka wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, Wasiirka wasaaradda Horumarinta Caafimaadka, Wasiirka wasaaradda Maalgashiga, masuuliyiin ka socday sanduuqa horumarinta

Abu Dhabi, waxgarad iyo dad kale haldoor ah.

Mudane Jaamac X. Maxamuud Cigaal, Wasiirkii hore ee Wasaaradda Tamarta



iyo Macdanta oo xilligaas hogaaminayey wasaaradda hadal uu ka jeediyey munaasibada si qoto dheer ugaga waramay ahmiyaddaha uu leeyahay mashruucan, waxaanu tilmaamay inuu wax weyn ka bedeli doono guud ahaan baahiyaha dhanka korantada ee Magaalada Berbera, isagoo si gaar ah u taabtay inuu mashruucani dhaqaale badan u madhxin doono dalka, hoosna u dhigi doono sicirka iibka adeegga Korantada. “Muhiimadahaan, mashruucu wuxuu gacan ka gaysan doonaa daboolidda baahida sii kordhaysa ee koboca dhaqdhaqaaqa ganacsi ee degmada iyo sidoo kale ballaadhinta dekedda Berbera” ayuu yidhi Md. Jaamac Maxamuud Cigaal. Wasiirku wuxuu u mahadceliyey Sanduuqa Horumarinta Abu Dabay,

isagoo ku ammaanay shidaalkaqaaliga ah kubeddeli in ay mashruuca ku doono tamarta qorraxda. dhammeystireen waqti aad u kooban, inkasta oo ay jireen dhaqdhaqaaqa dhaqaale oo caqabado badan. Wasiirku sarreeya, helitaanka kayd wuxuu intaa raaciyay dhaqaale, yareynta qiiqa “Mashruucu wuxuu yimi xilli kaarboonka ee hawada aad loogu baahanyahay” gelaya”

Mudane Maxamed Madaxwayne ku xigeenka Sayf Al Suwaydi, oo ah JSL Md. Cabdiraxmaan Agaasimaha Guud ee Cabdilaahi Ismaaciil Saylici



Sanduuqa Horumarinta Abu Dabay oo munaasabadda ka hadlay, ayaa muujiyey sida ay ugu qanacsanyihiin dhameystirka mashruucan oo muddo 7 bilood gudahood ah lagu soo gabagabeeyay, laga bilaabo Maarso ilaa Oktoobar sannadkii 2020, iyadoo lagu jiray xilli adag oo uu dunida saameyay xanuunka Coronavirus. Agaasimuhu wuxuu yidhi “Baahida loo qabo tamarta ayaa si isdaba joog ah ugu soo kordhaysa magaalada Berbera iyada oo dadku aad u bateen. Mashruucani wuxuu korontada ku siinayaa dadka qiimo la awoodi karo, maadaama uu adeegsiga

ayaa si weyn ugu mahadnaqay Dawladda Imaaradka carabta oo mashruucan ka hir galisay Berbera, waxanu bulshadareer Berbera ugu bushaareeyey in ay heli doonaan laydh jaban oo ku filan. Heshiis Isfahan (MoU) ayaa lagu saxeexay munaasabadda, taas oo uu markhaati ka ahaa Sanduuqa Horumarinta Abu Dabay, oo lahaanshaha xarunta lagu wareejinayo Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta oo uga wakiil ah Jamhuuriyadda Somaliland, isla markaana magacawday shirkad la-talin ah oo ah, Shirkadda Coretec, si ay Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta uga taageerto talo bixinta lagama maarmaanka

ah ee ay uga baahato dejinta Dawladda iyo Ganacsatadu ee nooceda ah ee dalka qaab dhismeedka guud ee Wadaagaan (PPP),si loo ka hirgashay ee noocan lo hawlgalinta xarunta. Mabda' hawlgaliyo loona dayactiro maamulo. ahaan waxa lagu heshiiyay xarunta tamarta qorraxda, in xaruntu ahaato Shirkad oo ah tii ugu horreysay



MASHRUUCA CUSBOONAYSIIINTA KORANTADA TAMARTA CEERIGAABO



Ceerigaabo(WT&M)-Iyadoo kaashaday maal-galintiisa waxay aad u soo dhaweeeyeen wasaaradda tamarta iyo dawladda Somaliland oo Mashruucan, waxayna macdanta Jamhuuriyadda ka helaya deeq dawlada sheegeen in ay naawilayeen Somaliland ka jawaabaysa Ingiriiska (FCDO) iyadoo Koronto jaban, la awoodi dhanka korantada ee ka jira soo dhexmarisay wasaaradda karo, la iskuna halayn karo. guud ahaan magaalooyinka Tamarta iyo Macdanta iyo dalka, taasoo kamida shirkadda bixisa adeegga waajibaadka shaqo ee korontoda ee Sanaag ay qaranka u hayso ayaa Electricity Company (sepco) Wasiirkii hore ee Wasaaradda, ee magaalada ceerigaabo ka Mudane Jaamac Xaaji- dhisan. Maxamuud Cigaal waxa uu si rasmi ah uga daahfuray Kulanka lagu daah-furay Mashruucan waxa ka qayb Magaalada Ceerigaabo galay, Wasiirka Tamarta iyo mashruuca tamarta korontoda Macdanta, Gudoomiyaha cusboonaata ee isku sidkan Gobolka Sanaag, Duqa 28.1.202.

Mashruucan oo ka Degmadda Ceerigaabo, Wasiirka wasaaradda Tamarta kooban;- 1MW oo Tamar Gudoomiyaha Komishanka iyo Macdanta oo markan dhaliyaha cadceedda ah Tamarta, Madaxda ku ahaa Md. Jaamac Maxamuud (solar), 640KWH oo Tamar midowday Shirkadaha Cigaal ayaa faahfaahin ka kaydiyaha korontoda ah Laydhka, Ganacsado, bixiyey fursadaha dahabiga (Battery Storage) iyo 3.2MW Wayeel, Haween iyo Marti ah ee laga helay mashruucan koronto dhaliyaha desil ka lagu horumarinayo oo isku sidkan ah, waxa iska Dhamaanba Masuuliyiintu korantada Magaalada Ceerigaabo,isagoo wasiirku



cadeeyey in lagu fulinayo hiigsiga iyo himilada qaran, iyadoo laga faaidaysanayo khayraadka wadanka si loo gaadho nolol wanaagsan iyo barwaaqo sooran.

Wasiirku waxa uu intaa ku daray isagoo sharaxaya Faaidooyinka kale ee mashruucan, “waxa uu hoos u dhigayaa qiimihii korontada ee hore:

1 unit Wuxuu ahaa = \$1
halka laga dhigay 1unit \$0.62
Ganacsiga yaryarna: \$0.59
Ganacsiga Waa waynna: \$0.39”

Sidoo kale Wasiirku wuxuu sheegay in mashruucan meesha ka saaray qiimihi go’naa taasoo muwaadinku bixin doono isticmaal kiisa oo kaliya, waxay saacaddu ku so qorto.

“Mashruucan waxa uu ka turjumayaa, ka

go’naashaha wasaaradda ee horumarinta iyo hagaajinta kaabayaasha Tamarta korontoda ee wadanka gaar ahaan kor u qaadida ka faaidaysiga Tamarta korontoda cusboonaata iyo kordhinta isticmaalkeeda.

Wasaaradda Tamarta iyo Macdantu, iyadoo fulinaysa siyaasadda iyo shuruucda Tamarta dalka, waxa ka go’an sii wadida, hirgalinta mashaariicda Isku sidkan sida mashruucan oo kale”ayuu mar kale yidhi wasiir Jaamac.

Mashruucan waxa uu si wayn uga qaybqaatay hoos-u-dhidiga qiimaha adeegga korotada Magaalada Ceerigaabo, iyadoo loogana faaidaystay wax-soo saarka, waxbarashada, caafimaadka iyo Kobaca dhaqaalaha guud ahaan iyo gaar ahaan horumarka warshadaha iyo ilaha kale ee lamidka ah.

AGAASIMAHA GUUD OO SAFAR SHAQO KU TAGAY CEERIGAABO



Agaasimaha guud ee Wasaaradda tamarta Cali oo ay weheliyaan xildhibaan ka tirsan iyo macdanta JSL Md. Mukhtar Maxamed Golaha Wakiillada, Maamulka gobolka

Sanaag iyo saraakiil Wasaaradda kamida, ayaa kormeeray maanta xarunta laga hirgeliyey dab-dhalinta tamarta la cusboonaysiiyo ee Magaalada Ceerigaabo oo ay maamusho shirkadda Korantada ee SEPCO, taasoo la hirgeliyey horaantii sanadkan.

Weftiga Wasaaradda ee uu hogaaminayo Agaasimaha guud iyo masuuliyiinta kale ee Kormeerka ku weheliyey, ayaa u kuurgalay qaabka ay shaqayso xaruntaasi iyo guud ahaan qaybaha laga dhaliyo Korantada Magaalada Ceerigaabo, waxaana halkaasi ku soo dhaweeeyey oo warbixin ka siiyey maamulka Shirkadda SEPCO ee gacanta ku haysa adeegga korantada Magaaladaasi.

Maxamuud Axmed liibaan Guddoomiyaha

hufan ee ay u maamulaan adeegga Korantada ee Magaalada, gaar ahaan qaybta lagaga faa'idaysanayo tamarta la cusboonaysiiyo, taasoo uu ku tilmaamay mid fursad weyn u ah bulshada gobolka Sanaag, gaar ahaan magaalada ceerigaabo.

Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Sanaag, Taliyaha qaybta Booliska iyo xildhibaan ka tirsan Golaha Wakiillada oo iyaguna halkaasi ka hadlay ayaa Shirkadda SEPCO iyo xukuumadda Somaliland ku amaanay maaraynta baahiyaha adeegga Korantada ee Magaalada Ceerigaabo.



Shirkadda Korantada Magaalada Ceerigaabo, ayaa sheegay in xaruntani si fiican u shaqayso oo bulshada looga faa'ideeyey khayraadka tamarta la cusboonaysiiyo, waxaana u mahad celiyey xukuumadda Somaliland iyo xafiiska mucaawimooyinka dawladda Ingiriiska ee DFID oo maal-gelinta mashruucan ay iska kaashadeen Shirkadda SEPCO.

Agaasimaha guud ee wasaaradda tamarta iyo macdanta Md. Mukhtar Maxamed Cali, ayaa shirkadda SEPCO uga mahad-celiyey sida

Mashruucan ka faa'idaysiga tamarta la cusboonaysiiyo, ayaa la furay bishii koowaad



ee sanadkan sii dhamaanaya 2021, waxaana markii la hirgeliyey uu wax weyn ka bedelay baahiyihii dhinaca adeegga iyo qiimaha lagu iibiyo Korantada

WASAARADDA TAMARTA IYO MACDANTA OO KA HIRGELISAY CUSBITAALKA LAASCAANOD ADEEG KORANTO OO LAGU NAJAXAY



Laascaanood(WT&M)-Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta waxa ay mashaariic adeegyo koranto ah gaadhsiisay goobo kala duwan oo baahi weyn u qabay helidda laydh ku filan, sida cusbitaallo iyo xarumo kale oo bulsho oo aasaasi ah.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Somaliland, Mukhtar Maxamed Cali iyo wefti uu hoggaaminayo oo booqasho ku tegay magaalada Laascaanood ee xarunta Gobolka Sool, ayaa xadhigga ka jaray mashruuc qalab ku shaqeeya tamarta qorraxda oo wasaaraddu ka hirgalisey Cusbitaalka Guud ee magaaladaasi 28.02.2021.

Waxa munaasibada furitaanka ka qaybgalay, masuuliyiinta Maamulka gobolka iyo degmada Laascaanood isuduweyaasha Wasaaradaha Caafimaadka iyo Tamarta iyo Macdanta, Agaasimaha Cisbitaalka Laascaanood iyo sarakiiil ka socotey Wasaarada Tamarta.

Maamulka Gobolka Sool iyo ka Degmaduba waxay aad ugu mahad celiyeen Deddaalka

dheer ee wasaaraddu gelisay mashruucan.

Xadhig ka jarka mashruucan waxa faafaahin ka bixiyey Agaasime ku xigeenka Tamarta Cabdirasaq Maxamed Abdi iyo Eng Faysal Muuse faarax.

“Mashruucan oo ah mid aan hore waddan ka iyo guud ahaan ba Aduunka ku Cusub , marka la eego Dhinaca Kaydkiise waxa uu isticmalayaa Baytariyo Casri ah(Supper Capacitor Batteries)

waxa uu ka koobanyahay Mashruucan:

1. Saxanka Qoraxda (Solar Panels) Tiradeeduna 182 Xabo, oo mid kiba yahay 390 W .
2. Kaydka korontada (Supper Capacitor Batteries.). Tiradoodu tahay 32 Batteries, oo mid kuba yahay 48V, 3.55Kwh.
3. Energy Server Qaad kiisu haya 100KWh.
4. Habka maamulka iyo Maamulida ee fogaanta.(Remote control system)


oo lagala socon karo Mashruuca sida marba uu ushaqaynaayo iyada oo aan lala joogin, Loona tilmaamikaro Cilahada ka yimaada cida loo xilsaaray ilaalintiisa”ayuu yidhi Agaasime Cabdirasaq.

Waxaanu intaasi ku daray “mashruucani waa mashruuc uu kaga kaaftoomi doono Cusbitaalku Korontadii qaaliga ahayd ee uu kharashka badani kaga bixi jiray, taasoo celcelis ahaan bishii gadhaysay \$4000

maanta se uu yahay \$0”

Agaasimaha guud ee Wasaaradda Tamarta iyo macdanta Md. Mukhtar Maxamed Cali oo xaflada isaguna hadal ka jeediyey, wuxuu tilmaamay inay tani kamid tahay dedaallada Wasaaraddu ku doonayso inay adeeg koranto oo haqab-beel ah u gaadhsiin lahayd dhamaan goobaha bulshada loogu adeeggo, sida Cisbitaallada, xarumaha yaryar ee caafimaadka iyo wixii lamida.

TARTANKA MASHRUUCA AAGGA TAMARTA CADCEEDDA EE SOMALILAND EE BAANKA ADDUUNKA (SEAP)



Hargeysa(WT&M)-Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Jamhuuriyadda Somaliland Md. Cabdilaahi Faarax Cabdi ayaa maanta Magaalada Hargeysa ku daah-furay tartan loo galay Mashruuca cusboonaysiinta Tamarta oo ay Maamuli jirtay Shirkadda Dahabshiil, kaasoo ay ku

soo tartameen 26 shirkood, kuna guulaysteen 12 kamidda bishii October 11, 2021.

- Madasha waxa goob joog ka ahaa Wasiirka wasaaradda Tamarta iyo Macdanta, Wasiirka Wasaaradda Shaqo Gelinta, Wasiir ku xigeenka Horumarinta

Maaliyadda, Gudoomiyaha Komishanka tamarta iyo Korontadda Qaranka iyo Wakiillo ka socday shirkaddaha ku tartamay Mashruucaasi oo ka koobnaa 26 shirkaddood. Mashruucan oo uu maalgeliyay Baanka adduunka oo soo mariyey wasaaradda macdanta iyo tamarta Jamhuuriyadda Somaliland, waxa munaasibada lagu furay ugu horayn ka hadlay Agaasimaha Waaxda tamarta ee Wasaaradda Liibaan Xaaji Maxamuud Warfaa oo sharaxaad ka bixiyey ahmiyadda iyo ujeeddada mashruucan, waxaanu tilmaamay inuu yahay barmaamuj lagu dhiirigelinayo ka faa'adaysiga tamarta dalka.



- “yoolka siyaasadda Qaranka Somaliland waxa weeyaan in la dhiiri-geliyo, lana dardar geliyo ka faa'adaysiga khayraadka tamarta, iyadoo looga faa'idaynayo horumarka dhaqaalaha dalkeena iyo horumarka bulshadeena”ayuu yidhi Agaasime Liibaan.

- Wasiirka Wasaaradda macdanta iyo



tamarta Jamhuuriyadda Somaliland Md. Cabdilaahi Faarax Cabdi, ayaa Baanka adduunka uga mahad-naqay maal-gelinta mashruucan, waxaanu ku dheeraaday baahiyaha qaranku u qabo dib-u-dhiska iyo horumarinta aagga koranto si bulshadu u hesho “waxa Dawladda Somaliland oo ay metelayso wasaaradda Macdanta iyo Tamarta ay u mahad-naqayaan Baanka adduunka sida fiican ee ula shaqeeyo Jamhuuriyadda Somaliland oo ay ka wakiil tahay Wasaaradda Macdanta iyo tamarta oo uu kala shaqeeyo horumarinta aagga Tamarta”ayuu yidhi wasiirku isagoo intaasi raaciyey “sida aad wada ogtihiin dagaaladii Waddankeena ka dhacay waxa inagaga burburay Kaabeyaashii tamarta oo dhan, waxaanad ogtihiin maanta in aanay jirin shabakad isku xidhan oo qaybisa dabka, taasoo gaadhsiisa magaaladan gudaheeda (Hargeysa) ama dibadeeda ama dalka oo dhan”

- Guddoomiyaha Komishanka Tamarta Md. Axmed Faarax Cadare, ayaa tilmaamay in mashruuca ay Wasaaradda Macdanta iyo tamarta ay uga gol-leedahay in adeegga korantada bulshada lagu gaadhsiiyo si haqab la'aan ah, isla markaana sahlan, iyadoo ay iskaashanayaan dhamaan daneeyayaasha horumarinta tamarta Qaranka. Wasiirka Wasaaradda shaqo-gelinta, arrimaha bulshada iyo qoyska Md. Mustafe Maxamuud Cali Bile iyo masuuliyiin kale oo halkaasi ka hadlay ayaa wasaaradda macdanta iyo tamarta iyo saaxiibada kala shaqaynaya mashruucan ku amaanay dedaalka wada-jirka ah ee ay geliyeen hirgelinta mashruucan, waxaanay ku booriyeen inay sii wadaan oo uu noqdo mid lagu tanaado.
- Ugu dambeyn waxa xafladaasi loogu saxeexay mashaariicdii ay ku guulaysteen laba iyo tobanka shirkaddood ee ku guulaystay mashruucaasi, iyadoo ay masuuliyiinta madasha ka hadlay si guud u hambalyeeyeen dhamaan tartameyaasha.

Barmaamujkan Somaliland Electricity access project “SEAP”), ayaa ku tirsan

mashaariic kala duwan oo ay Wasaaraddu sanadkan dardar-gelisay fulintooda.

CILMI BAADHISTA TAMAR-DHALIYAHA DHULKA HOOSE



Berbera (WT & M) - Iyadoo Wasaaraddu ka duulaysa masuuliyadda ka saaran sidii ay qaranka ugu heli illo-tamareed oo kala duwan waxa ay wasaaraddu samaysay sanadkan gudihiisa daraasado laga fuliyey meelo kala duwan.

Agaasimaha guud ee wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Somaliland Mukhtar Maxamed Cali oo ay weheliyaan koox khuburo ah iyo Agaasimeyaash waaxyaha Shidaalka iyo Tamarta ayaa safar ku tagay Gobolka Saaxil,

gaar ahaan deegaanka Gaha Biyo-Kulul oo hoos yimaadda degmada Xagal 11/02/2021.

Safarkan ayay u jeedadiisu ahayd cilmi-baadhis hordhac ah oo ku saabsan tamarta “kulka” dhulka hoostiisa laga dhaliyo (Geothermal Energy).

Ifafaalaha ka soo baxay cilmi-baadhista hordhaca ah ee laga sameeyey tamarta dhulka hoostiisu ayaa muujisay jiritaanka dhamaan astaamaha suurta gelinaya in laga dhaliyo tamar wax ku ool ah.

DAAH-FURKA SAHAN MACDANEED OO LAGA FULIYEEY GOBOLKA SAAXIL



Berbera(WT&M)-Berbera Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ee Jamhuuriyadda Somaliland iyo wefti uu hogaaminayo oo hawlo shaqo u tegay a gobolk Saaxil, ayaa daahfuray sahan macdaneed oo laga fulinnayo gobolka Saaxil, gaar ahaan deegaamada Bahalallay, laallays, Hudisa iyo Garbo Raarreed bishii 10/8 2021.

Wasiirka waxa weftiga ku wehelinayay Gudoomiyaha Gobolka Saaxil, Gudoomiyaha Golaha Deegaanka ee Degmada Berbera Mudane Cabdishakur Maxamuud Xasan (Cidin) iyo Taliyaha Qaybta Booliska Gobolka Saaxil Cabdi Cali Xays.

Sahanka Macdanta ayaa waxa fulinnayay aqoonyahanka waaxda Macdanta ee Wasaaradda Macdanta iyo khubaro ku xeel-

dheer aqoonta cilmiga dhulka oo ka socday Shirkadda Khalifa Engineering and Mining Services.hawlgalkan, ayaa la qorsheeyay inuu socdo muddo shan iyo afartan (45) cisho ah, waxaana Muddada la waday la baadhay dhul cabirkiisu dhan yahay boqol iyo laba-iyo-laabatan kiilomitir oo laba jibaaran (122 km²) oo kamida deegaamada kor ku xusan.baadhitaanka ayaa ahaa mid si gaar ah ugu taxaluqay qaabka samaysanka dhulka, macdahanaha loo filayo in laga helo, iyadoo la qaaday muunnado shaybaadho casri ah loogu soo baadhay, sidoo kale, waxa la diyaarinayey warqadda cilmiga dhulka oo si sugan u sharaxi doonta qaab dhismeedka deegaanka la baadhay.Waxa xusid mudan in ay ahayd markii ugu horaysay ee la isticmaalay qalabka jiyoofisikis-ka (Magnetometer) si wax looga ogaado macdanaha ku jira oogada

hoose ee dhulka, isla-markaana si isku dhafan loo wada turjumo xogaha laga helay satellite-ka (Remote Sensing Analysis) ee goobaha la danaynayo.

Maxamuud Cidin oo isaguna halkaasi ka hadlay, ayaa si weyn u soo dhaweeyey howlgalkan xukuumaddu fulinayso ee gobolka Saaxil laga fulinayo. “Waxaynu



Munaasibada lagu daah-furay mashruucan Macdan baadhista oo ka dhacday mid kamida deegaamada laga fulinayo hawsha, ayaa waxa ugu horayn ka hadlay Agaasimaha Waaxda Macdanta ee Wasaaradda Cumar Yuusuf Cumar oo faahfaahin ka bixiyey baaxada Mashruucan iyo qorshaha hawlgalkiisa. “sanadkan 2021 waa wajigii koowaad ee mashruuca oo bilow ah. wuxuu daaran yahay kan aynu maanta u joogno gobolka Saaxil keliya laba goobood oo kamida. qaybta Hudusa oo ah 92KM oo laba jibaaran iyo qaybta geel loo kor oo 30KM oo laba jibaaran ah, howshiisa waxaanu ku bilownay in aanu raadino xogihii hore, markii aanu xogihii helnayna waxaanu uga dhaqaaqnay in aanu khariidadii samayno, turjumaadna ku samayno, helno sugnaanshiyihii xogta goobaha”ayuu yidhi Agaasime Cumar.

Maayirka Degmada Berbera Cabdishakuur

nahay dal lagu isticmaalo boqolkiiba sagaal iyo sagaashan wuxuu la soo dego, markaa khayraadkeena iyo nimcooyinkeena alle ina siiyey inaynu la soo baxno oo ay noqdaan waxaynu dhoofino oo aynu horumar ku gaadhnay waa muhiim, kolkaa siyaasadda Wasaaraddu aad iyo aad ayey u qiimo badan tahay, iyadoo ay tahay qaybtii 4aad, horena kii weynaa ee Shidaal baadhista loo fuliyey”ayuu yidhi Maayir Cabdishakuur Cidin. Guddoomiyaha Gobolka Saaxil Dr. Axmed Maxamed Xaashi, ayaa dhankiisa balanqaaday inay hawl-wadeennada Wasaaradda ee mashruucan fulinaya kala shaqayn doonaan wax kasta oo ay uga baahdaan, isagoo dhinaca kale bulshada ku dhaqan deegaamada hawsha laga fulinayo ku war-geliyey inay soo dhaweeyaan oo ay la shaqeeyaan Wasaaradda iyo shaqaalaha ka shaqaynaya.



Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xilligaas ahaa Md. Jaamac Xaaji Maxamuud Cigaal, ayaa sheegay in barmaamujkan macdanbaadhistu ku taxaluqo fulinta Siyaasadda iyo waajibaadka Wasaaradda ee ah sidii uu Qaranku uga faa'adaysan lahaa khayraadka dabeeciga ah ee ku duugan.

“Waxa aynu hawshan u qabanaynaa oo aynu halkan u joognaa oo ay siyaasadda Wasaaraddu tahay si dhaqaalaha dalkeenu kor ugu kaco inaynu khayraadka alle inagu manaystay ee aynaan war u hayn meesha uu ku jiro iyo inta uu leeg yahay in Wasaaraddu xilkeeda gudato oo ay soo saarto oo ay marka hore ogaato macdanta dhulkeena ku jirta nooca ay tahay iyo baaxada ay leeg tahay, taasoo marxalado kala duwan mari

doonta”ayuu yidhi.

Wasiirka ayaa sidoo kale bulshada dhulka sahaminta laga sameeyey ku bogaadiyey, uguna mahad celiyey sida niyad-samida iyo waddaniyadu ku dheehan tahay ee ay u soo dhaweeyeen, waxaanu ku tilmaamay inay yihiin umad u diyaarsan in nimcada dhulkooda ku jirta loo soo saaro oo ay ka faa'idaystaan.

Ugu dambeyn, Mashruucan wuxuu qayb ka ahaa mashaariic sahan macdaneed oo ay wasaaraddu bilawday sanadkii 2020, kuwaas oo dawladda Somaliland ay ka maalgalisay cashuurta dadwaynuhu bixiyo.

mashaariicdaasi waxa la doonayaa marka lagu guulaysto inay qayb ka noqdaan dedaallada qaran ee lagu cidhib-tirayo saboolnimada.

WASIIRKA MACDANTA OO SOO AFJARAY KHILAAFKII DEGMADA FIQI-AYUUB




Fiqi-ayyub (WT&M)- Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Jamhuuriyadda Somaliland Md. Cabdilaahi Cabdi Faarax iyo Wefti uu hogaaminayo oo ka kooban xubno kamida Golaha Wasiirrada iyo saraakiil ka tirsan Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta, ayaa booqasho hawleed ku tegay Degmada Fiqi-ayyub 2-dii bishii November ee sanadkan 2021, halkaasoo ay kala kulmeen soo dhaweyn balaadhan dadweynaha deegaankaas, iyagoo Weftigu bulshada kala hadlay sidii Dawladda ay ugala shaqayn lahaayeen ka faa'adaysiga Khayraadka macdanta ee laga helay Degmadaas.

Wasiirka Wasaaradda tamarta Md. Cabdilaahi Cabdi Faarax oo khudbad dheer u jeediyey dadweynaha reer Fiqi-ayyub, ayaa balanqaaday in la saxayo wax kasta oo abuuri kara khilaaf iyo cabasho saameeya habsami-u-socodka mashruuca macdan qodista degmada.

“waxaannu u soconaa aniga iyo cidii ila socotaaba wixii qalad ah ee dhacay in la saxo, wixii wanaag ah ee dhacayna in la sii wado. cidii idinka idinka wakiilka ahayd, xubnaha wasiirrada ee gobolka iyo wasaaraddiiba intaanu wada fadhiisano ayaa qolo waliba garteeda akhrisan doontaa oo wixii dhacay oo dhan laysla sixi doonaa si mustaqbalku u

wanaagsannaado”ayuu yidhi Wasiirku.

Isagoo hadalka sii wata waxa uu intaasi ku daray Wasiirku “haddii aan hawshan cid waliba raali ku noqon oo aanay shirkaddu



raali ku noqon oo aan culayska badan laga dayn, haddaan wasaaraddaha iyo dawladda lala shaqayn, haddaan amniga laga shaqayn deegaanka oo kaliya hagaagi maayo. iyadoo intuba wada shaqaynayo oo mid walba waajibkiisa gudanayo oo lagu eeggayo, loona fududaynayo oo lagu dhiiri gelinayo, ayeynu wax ku gaadhi karnaa”ayuu mar kale ku baraarujiyey Wasiirku dadweynaha degmada.

Md. Cabdilaahi Cabdi Faarax, waxa kale oo uu hoosta ka xariiqay inay wasaaraddu ka soo baxayso waajibaadka kaga aaddan suggida xuquuqda bulshada deegaanka ee la xidhiidha ka faa’idaysiga macdanta “waxaan u diyaar ahay inay wasaaraddaydu wixii khuseeya macdanta iyo wixii kale ee khuseeya dawladdaba hadday tahay Iskuullo iyo hadday tahay caafimaadka idinkala shaqayso oo aannan Fiqi-ayyub wixii aan u qaban karayo u qabto”

Xubnaha weftiga ee uu Wasiirku hogaaminayo ayaa sidoo kale kulamo la yeeshay maamulka, waxgaradka iyo aqoonyahanka degmada iyo waliba dhinaca Shirkaddaha ka qodaya macdanta halkaasi, waxaanay kala hadleen sidii looga foggaan lahaa wax kasta oo dareen iyo dooc ka abuuri kara dhexdooda.

Ugu dambeyn wasiirka iyo weftigiisu waxa ay ku guulaysteen inay soo afjaraan khilaafkii u dhexeeyey bulshada iyo macdan-qodeyaasha, taasoo keentay inuu si nabad-gelyo ah u socdo mashruucaasi.

Wasiirka wasaaradda tamarta iyo macdanta Md. Cabdilaahi Cabdi Faarax waxa socdaalkaasi ku wehelinayey Wasiirka wasaaradda xidhiidhka goleyaasha iyo dastuurka Md. Maxamed Xaaji Aadan iyo Wasiirka wasaaradda Cadaaladda Md. Saleeban Warsame Guuleed iyo saraakiil ka socda wasaaradda macdanta iyo tamarta.

AGAASIMAHA GUUD OO SO AF_JARAY MURAN U DHAXEYEY SHIRKADDA XIDID_MADOW IYO DADWAYNAHA DEEGAANKA



Agaasimaha guud ee Wasaaradda iyo xildhibaano ka tirsan Gudidda Golaha tamarta iyo macdanta Md. Wakiillada, ayaa ku guulaystay inay soo Mukhtaar Maxamed Cali oo afjaraan muran u dhexeeyey Shirkadda hogaaminayey wefti ka kooban Xidid-madow iyo dadweynaha deegaanka masuuliyiinta wasaaradda, maamulka oo cabasho ka muujiyey hannaanka qodaalka gobolka Sanaag, ka degmada Ceerigaabo dahabka.



WAAXDA SHIDAALKA IYO GEEDI SOCODKA HAWLAHA SHIDAALKA



Waaxda Shidaalka ee Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta waxaa la aasaasay dabayaaqadii 2016. Waaxdu waxay wasaaradda iyo guud ahaanba qaranka u xilsaaran tahay waajibaadka soo socda:

- U ololaynta khayraadka Shidaalka iyada oo la samaynayo hawlo joogto ah oo suuq-geyn ah si loogu soo jiido maalgelin caalami ah
- Curinta iyo dib-u-eegidda siyaasadda iyo xayndaab sharciyeedka sharci ee Shidaalka iyo weliba u ololaynta meelmarinta
- Gelitaanka heshiisyada sahaminta iyo wax soo saar wadaaga oo lala galo shirkadaha Shidaalka
- La socodka iyo kormeerka hawlaha Shidaalka iyo u hogaansanka shirkadaha ee waajibaadka heshiisyada

iyo shuruucda kale ee dalka

- Qaadidda, ururinta, kala shaandhaynta, turjumidda iyo xafididda xogaha Shidaalka
- U ololaynta tababarada iyo kobcinta aqoonta muwaadiniinta ee la xidhiidha cilmiga Shidaalka, si muwaadiniintu ula wareegaan shaqooyinka aqoonta u baahan ee shidaalka
- Kor u qaadidda fahanka dadweynaha ee sahaminta iyo ka faa'iidaysiga Shidaalka iyo aasaasidda wadashaqayn xoogan oo lala yeesho laamaha hawl-wadaaga iyo Bulshada

Xayn-daab sharciyeedka (legal Framework) sahaminta iyo soo saarista Shidaalka ee Waaxda khuseeya ayaa kala ah

1. Siyaasadda Sahaminta iyo soo-

saaridda Shidaalka

2. Xeerka Sahaminta iyo soo saaridda Shidaalka
3. Xeerka Maamulidda Dakhliga Shidaalka
4. Heshiiska Wax-soo saar Wadaagga Xeer-hoosaadyada Sahaminta iyo soo saaridda Shidaalka

Waxqabadka Waaxda ee xagga iib-geynta khayraadka shidaalka



Waaxdu waxay xidhiidho joogto ah la samaysaa shirkaddaha Shidaalka si ay u maalgashadaan khayraadka Shidaalka ee dalka. Waxaana jira shirkaddo muujiyey danayn maalgashi oo wadahalad u socdo wasaaradda.

Waaxdu waxay isku soo dubaridey ka qaybgalka shirka Africa Oil Week oo ah kulanka ugu weyn ee Shidaalka ee Africa. Wefti uu hogaaminayo Wasiirku ayaa shirkaa ka qayb gelay, isagoo maalintii

Isniinta ee 8-da Nofeembar ka furmay magaalada Dubai. Wasaaradda waxay halkaa ku soo badhnigtay khayraadka iyo fursadaha ganacsi ee Shidaalka Somaliland.

Waxqabadka Waaxda ee xagga shuruucda

- Waaxdu waxay gudi-hoosaadkii hore ee khayraadka ee Golaha Wakiilada kala shaqaysay Xeerka Sahaminta iyo Soo saarista Shidaalka.
- Waaxdu waxay dib u habaysay hab-raaca heshiisyada sahaminta iyo wax soo saar wadaaga (Exploration and Production Sharing Agreement, PSA)
- Waaxdu waxay wasaaradda horumarinta Maaliyadda kala shaqaysay u ololaynta Xeerka Maamulidda Dakhliga Shidaalka
- Waaxdu waxay wadaa curinta xeer-hoosaadyadii ka farcamayey Xeerka Sahaminta iyo Soo saarista Shidaalka.

Waxqabadka Waaxda ee xagga Xogta (data)

- Waaxdu waxay ku guulaysaray inay soo ururiso dhammaan xogihii hore iyo kuwii dhowaan ee laga qaaday dalka, marka laga reebo xogta sahankii badda ee ay qaaday shirkada TGS-NOPEC, oo iyadana ay waaxdu ku hawlan tahay sidii ay ula soo wareegi lahayd.
- Waaxdu waxay qorshaynaysaa in la sameeyo xarun xogeed lagu xafido dhammaan xogaha Shidaalka iyo in xogahaas loo qaabeeyo hanaan isku dubaridan oo u diyaarsan maalgashi.

Waxqabadka Waaxda ee xagga Kobcinta Aqoonta (Capacity Building) iyo xirfadaha

Shaqaalaha waaxdu waxay nasiib u heleen inay qaataan tiro badan oo koorsooyin aqoon kobcin (capacity building) ah oo waaxdu/wasaaradda

u qorshaysay, kuwaas oo ay ku jiraan kuwo farsamo, maamul iyo luuqadeed, qaarkoodna ay gaadhsiisnaayeen heerka derajada labaad ee jaamacadda (masters

degrees).

- Waaxdu waxay ardayda cilmiga geology-ga ku dhigta waddanka gudihiisa u samaysaa aqoon-kobcin, iyada oo laga qayb geliyey tababarada wasaaradda gudaheeda laga bixiyo, islamarkaana khibrad korodhsi ahaan loogu qaadi jirey goobahii sahamada shidaalku ka socdeen
- Shaqaalahii kala duwanaa ee ka hawlgalay mashariicdii sahaminta shidaalku waxay hawlaha ka dhaxleen oo la siiyey tababaro xirfadeed oo kala duwan oo tayadoodu sarayso, iyaga oo shaqooyinkii xirfadaha u baahnaa kala wareegay shaqaalihii ajanabiga ahaa ee shirkadduhu markii hore dibadda kala yimaadeen.

Waxqabadka Waaxda ee xagga Wacyigelinta Bulshada (Community Engagement)

- Waaxdu waxay ku guulaysatay inay samayso barnaamij wacyigelin bulsho oo dhammaystiran kana kooban 8 qaybood kaas oo si guul ah loogu fuliyey dhammaan mashaariicdii sahaminta Shidaalka.
- Barnaamijka wacyigelinta waxaa garab socdey shaqo abuur balaadhan iyo mashaariic badan oo hormarin bulsho oo laga fuliyey deegaanada sahamintu ka socotey. Mashaariicdaas waxaa ka mid ahaa; xarumo caafimaad, xarumo waxbarasho, xarumo bulsho, gaadiid iyo qalab caafimaad.

GOLAHA WAKIILLADA OO ANSIXIYAY XEERKA SAHAMINTA IYO SOO-SAARIDA SHIDAALKA



Hargeysa(WT&M)-haraantii sanadkan 2021 guulaha wax ku oolka ee ay Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta JSL gaadhay waxa kamid ahaa ansixintii Xeerka sahaminta iyo soo-saarida Shidaalka ku duuggan dalkeena, taasoo ah talaabo hor leh oo uu qaranka

Somaliland hore u qaaday si uu fursad hor leh ugu helo suulinta faqriga, saboolnimada iyo shaqo la'aanta, ugana faa'idaysano khayraadka uu alle ku manaystay ciiddeena.

Fadhi ay yeesheen mudaneyaashii hore ee Golaha Wakiillada JSL 19.1.2021,

kaasoo ay ka qaybgaleen 46 mudane, shirguddoominayeyna guddoomiyihii golahaas hore Md. Baashe Maxamed Faarax ayaa waxa ay xildhibaanadu qodob qodob ugu ansixiyeen xeerka Sahaminta iyo soo-saarida shidaalka oo kamid ahaa mashaariicda sharci ee ugu jiray ajandahooda, isla markaana ay u soo gudbisay Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta JSL.

Kaddib, markii ay mudaneyaashu qodob qodob ugu codeeyeen xeerka, codayn guud oo uu guddoomiyuhu gelliyeey, waxa ogolaaday ansixinta xeerkaasi 40 Xildhibaan, 5 mudane ayaa ka aamusay, guddoomiyuhuna muu codaynin. sidaasi ayaanu ku ansaxay xeerkaasi ahmiyad weyn u leh qaranku, sida uu Guddoomiyaha Golaha Wakiillada oo natijada codaynta ku dhawaaqay cadeeyey, kuna sheegay in Xeerka sahaminta iyo soo-saarida Shidaalku, sidaasi ku ansaxay.

Fal-celinta Wasaaradda

Dhinaca kale, Masuuliyiinta Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta JSL, oo markii xeerka goluhu ansixiyeey warbaahinta la hadlay, ayaa soo dhaweeyey meel-marinta sharcigan oo ay ku tilmaameen mid ay la'aantiisu caqabad ku ahayd maamulka, maareynta iyo munaafacaadsiga khayraadka Shidaalka dalka ku jira.

Agaasimaha guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta iyo Agaasimaha Waaxda Shidaalka ee Wasaaraddaasi oo wariyeyaasha kula hadlay xarunta Wasaaradda, ayaa golaha Wakiillada ku bogaadiyey ansixinta sharcigan.



Axmed Iidaan Aadan Agaasimaha Waaxda Shidaalka ee Wasaaraddaasi oo ugu horayn ka hadlay shirka jaraa'id, ayaa faahfaahin ka bixiyeey qaar kamida qodobada muhiimka ah ee xeerkan ku jira, waxaanu dhinaca kale, si' guud u iclaamiyey aasaaska xeerkani albaabka u furayo tacab-gelinta iyo tuujinta Khayraadka shidaalka ee dalka ku duuggan waddanka.

“Sida uu sharcigani dhigayo dastuurkuna dhigayo wixii dhulka hoostiisa ku jira waxa leh Qaranka, waxaana uga masuul ah dawladda, sidaas darteed Xeerku wuxuu ka hadlayaa cida maamulaysa Shidaalka ee awoodda u leh, taasoo ah Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta.

waxyaabaha Sharcigu ka hadlayo waxa kamida meelaha loo furayo sahaminta iyo sida dadweynaha loo ogaysiinayo, waxyaabaha kale ee uu ka hadlayo waxa kamida sida ay Shirkadduhu u soo codsanayaan qandaraasyada iyo sida loo maamulayo, xuquuqaha ay kala yeellanayaan dawladda iyo Shirkadduhu”

Agaasime Iidaan isagoo hadalka sii wata waxa uu intaasi ku daray “Xeerku waxyaabaha kale ee uu ka hadlayo waxa kamida xeerku marka la helo sida loo soo saarayo dariiqa loo marayo, sida loo ilaalinayo fayodhowrka

iyo bad-qabka deegaanka.

Sharcigani waa sharci muhiimad weyn leh oo dalku u baahnaa, iminka wixii ka dambeeyana wasaaraddu waxay curinaysaa siyaasadihii iyo xeer-hoosaadyadii ka farcamayey, waxaan odhan karnaa maanta Wasaaradda, shirkaddihii doonayey in ay



shidaalka baadhaan iyo kuwii doonayey in ay maalgashadaanba waa u guul”

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Mukhtar Maxamed Cali oo isaguna halkaasi ka hadlay, ayaa ugu horayn uga mahad celiyey golaha Wakiillada JSL ansixinta xeerkan, waxaanu si gaar ah u bogaadiyey guddi hoosaadka golahaasi ee Khayraadka dabeeciga ah oo golaha u

gudbiyey, kaddib markii ay soo naaqisheen, kana baaraan-degeen qabyo-qoraalkiisa.

Agaasime Mukhtar ayaa sheegay in baahida xeerkani timi, kaddib markii la aqoonsaday inuu Somaliland ku duuggan yahay Khayraad badan oo Shidaal, sidaasi darteed uu fure iyo hage u noqon doono ka faa’idaysiga Khayraadka dihin ee Shidaalka.

“Sharigani wuxuu ka jawaabayaa su’aasha ah Shidaalka Somaliland ku jiraa ma yahay mid ganacsi gal ah oo loo dhoofin karo dalalka caalamka, taas ayuu ka jawaabayaa oo wuxuu sheegayaa sidii loo maamuli lahaa khayraadka shidaalka”ayuu yidhi isagoo intaasi ku daray “sharciga waxa ku jira sida loo kala helayo xuquuqaha saamiga khayraadka, deegaamada iyo gobolladu xuquuqda ay ku yeellanayaan”

Mukhtar Maxamed Cali Agaasimaha guud ee Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta, waxa kale oo uu iftiimiyey in xeerkani marka uu dhaqan-galo meesha ka saari doono caqabado badan oo Wasaaradda iyo Qaranka ka haystay la-tacaamulka iyo wada-shaqaynta maal-gashadeyaasha Waddaniga ah iyo kuwa caalamiga ah ee doonaya inay dhaqaale geliyaan soo-saarida khayraadka shidaalka “caalamka cid kasta oo inay ku maal-gashato doonaysaa waxa ay ku waydiinaysaa sharci, haddii aanad sharci idin kala haga lahayn, cid ku aaminaysaa ma jirto”ayuu yidhi.

WASIIRKA WASAARADDA OO XILKA LA WAREEGAY



Sanadka gudihiisa waxa wasaaradda ka dhacay isbedel maamul oo kamida sunaha dawladnimada, waxaana madaxweynuhu u soo magacaabay wasiir cusub.

Sidaas darteed, Wasiirkii hore ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Jaamac Xaaji Maxamuud Cigaal ayaa xilka ku wareejiyey Wasiirka cusub Muddane Cabdilaahi faarax cabdi, munaasibad lagu qabtay xarunta Wasaaradda 9 Sep 2021.

Xafladan xilwareejinta waxa ka qayb galay Wasiirka wasaaradda Arimaha Gudaha, Wasiirka Cadaaladda, Gudoomiyaha Komishanka Korontadda, Gudoomiyaha Hay'adda Barakacayaasha, Guddoomiyaha Maamul wanaagga iyo la-dagaalanka Musuqmaasuq, masuuliyiin ka socday shirkaddo kala duwan oo maxali ah iyo kuwo caalami ah, wakiillo ka metelayey

hay'addaha Ajaanibka ah ee dalka ka shaqeeya gaar ahaan kuwa sida gaarka ah ula shaqeeya wasaarada, madaxdhaqameed iyo marti-sharaf kale.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo macdanta Mukhtaar Maxamed cali oo ugu horayn munaasibadda hadal kooban ka jeediyey ayaa soo dhaweeyey Wasiirka Cusub, Mudane Cabdilaahi Faarax Cabdi, isagoo dhinaca kale mahad-naq ku sagootiyey wasiirkii hore.

Agaasimaha Guud, ayaa balanqaaday inay Wasaarad ahaan si fiican ula shaqayn doonaan Wasiirka.

Agaasimaha Waaxda Qorshaynta Eng Cabdifataax Cumar Cabdilaahi oo isaguna madasha ka hadlay ayaa shaqo-wanaag iyo hogaamin tolmoon ku amaannay Wasiirkii ee xilka wareejiyey Md. Jaamac oo muddo afar

sanno ku dhow wasaaradda hogaaminayey.

Wasiirkii hore Md. Jaamac Xaaji Maxamuud Cigaal oo Munaasibadda uu xilka ku wareejiyey khudbad ka jeediyey, ayaa ugu



horayn u mahad celiyey shaqaalihii la soo shaqeeyey, waxaanu ka waramay mashaariic

door ah oo uu hirgaleyey intii uu xilka hayey. sidoo kale waxa uu soo dhaweeyey wasiirka shaqada kala wareegay, kaasoo uu u balanqaaday inuu la shaqayn doono wax kasta oo uu uga baahdana la garab taagan yahay.

Wasiirka wasaaradda tamarta iyo macdanta mudane Cabdilaahi Faarax Cabdi, ayaa u mahad naqay Wasiirka hore, kuna hambalyeeyey wax qabadka laxaadka leh ee la taaban karo ee uu wasaaradda ka qabtay mudadii uu xilka hayey, waxaanu balan qaaday inuu halkaa ka sii wadi doono shaqada.

Masuuliyiintii iyo marti-sharafta ka qaybgalay oo xaflada ka hadlay ayaa Wasiirka xilka la wareegay ugu duceeyey inuu alle ku asturo masuuliyadda uu qaaday, ka wareejiyeyna uga mahad-celiyey intii uu qaranka u shaqaynayey.

Ugu dambeyn labada masuul ayaa si rasmi ah isugu wareejiyey xilka.



KULAN ISBARASHO & XOG IS- WAYDAARSI DHEX MARAY WASIIRKA, AGAASIMAHA GUUD & AGAASIME- WAAXEEDYADA WASAARADDA



Hargeysa(WM&T)-Wasiirka Wasaaradda tamarta iyo macdanta JSL Madane Cabdilaahi Faarax Cabdi, ayaa kulan is-barasho iyo xog isweydaarsi ah la yeeshay Agaasime-waaxeedyada Xafiisyada kala duwan ee

Wasaaradda.

Shirka oo ka qabsoomay Xafiiska Wasiirka ayuu warbixino la-iadhiidha shaqada waaxyaha iyo Xafiisyada ay Masuulka ka yihiin kaga dhegaystay Agaasime

Waaxeedyada kala duwan ee Wasaaradda.

Agaasimeyaasha waaxyaha ayaa si fiican ugu sharaxay Wasiirka waax waliba shaqada ay gacanta ku hayso, waxyaabaha u qorshaysan iyo guulihii ay gaadhay.



WAAXDA CUDUDA SHAQAALAHA



Waaxda cududa shaqaalaha (Human resources Department) ee wasaaradda Tamarta iyo Macdantu waxa ay u taagan tahay, masuulna wasaaradda uga tahay, horumarinta, tayeynta iyo tabobaridda shaqaale weynaha Wasaaradda.

Waddan ba Waddanka ka uu ka shaqaale tayo wanaagsan buu ka horumar marsan yahay kana wax qabad iyo wax soo saar badan yahay.

Waaxda cududa shaqaalaha ee Wasaaradda Tamarta iyo

Macdantu waxay ku foogan tahay inay is-xidhobundhigna u noqoto hurumarinta iyo isla jaan qaadka shaqaalaha kala duwan ee wasaaradda Tamarta iyo Macdanta, si loo gaadho u jeedada wasaaradeed iyo midka qaran ee sida toogan is-dheeli tiraya.

Waaxda cududa shaqaaluhu siduu qorshaheedu yahay waxay Abooda saartaa Tayaynta iyo Tobabaridda Shaqaalaha weynaha wasaaradda, waxa ay diyaarisaa isuna duba ridaa inuu qabsoomo shirkii bilaha

ahaa ee ay shaqaalaha iyo masuuliyiinta wasaaraddu isu xog waraystaan, Sanad walba marka uu dhamaaddo waaxdu waxay qabataa Qiimayn shaqaale, shaqaalaha ugu wax qabadka fiicnaa sanadkaanna waxay gudoonsiisaa Abaal marin si ay u dardar geliyaan shaqadda shaqaalaha kalana ugu hirtaan.

Isu-duweyaasha Wasaaradda & Waaxda xidhiidhka Dadweynaha Oo tababar la siiyey



Hargeysa (WT & M) - Si kor loogu qaado aqoonta iyo xirfadda Shaqaalaha gobolada iyo xarunta guud wasaaraddu waxay tababarro siisay xubno kamida Isu-duweyaasha iyo Shaqaalaha Xarunta wasaaradda ee Hargeysa.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta Mudane Mukhtar Maxamed Cali oo uu weheliyo agaasimaha waaxda shaqaalaha ayaa 18.2.2021 Magaalada Hargeysa tababar ugu xidhay 20 xubnood oo ka kooban isku-dwayaasha wasaaradda u joogga gobolada, shaqaalaha xidhiidhka dadwaynaha iyo shaqaalaha xarunta guud ee wasaaradda.

Tababbarkan oo socday muddo shan cisho ah, ayaa ujeeddadiisu ahayd sidii loo kobcin lahaa xirfadaha wada-xidhiidhka gudaha iyo ka dibadda ee wasaaradda iyadoo la marayo hababka ugu fiican, uguna sahlan.

agaasimaha guud ee Wasaaradda Md. Mukhtar Maxamed Cali oo munaasibada xidhiidhka tababarka hadal dardaaran ah ka jeediyey, ayaa xusay in tababbarkani aanu noqon doonin mid maalintan uun ku ekaada, balse ay wadi doonaan dedaalka koncinta aqoonta iyo xirfadaha shaqaale waynaha wasaaradda.

Xubno kamida ka qaybgaleyaasha tababbarkan oo iyaguna halkaasi hadlay

ayaa tilmaamay sida ay baahida ugu qabeen xirfadahan iyo in ay shaqooyinkooda maalinlaha ah ka caawin doonto aqoonta la baray, waxaanay u mahadnaqeen khabiirka bixinayey tababbarka mudane Saddaam Carab.

Gabagabadii munaasibadda agaasimaha guud ayaa Shahaadooyinguddoonsiiyey 20-kii xubnood ee ka faa'idaystay tababbarkan, wuxuuna u mahad celiyey waaxda wasaaradda ee soo agaasintay iyo tababaraha bixinayey duruusta.

WASAARADDA TAMARTA& MACDANTA OO ABAAL MARISAY SHAQAALIHII UGU WANAAGSANAA SANNADKII 2020



Hargeysa (WT&M)-
Abaal-marinta
sanadlaha ee
Shaqaalaha Wasaaraddu waa
mid kamida talaabooyinka
lagu dhiiri-gelinayo
shaqaalaha, taasoo ku
timaada qiimeyn lagu
sameeyo shaqaalaha, isla
markaana lagu abaal-mariyo
xubnaha ugu shaqada
wanaagsan.

Munaasibad abaalmarineed
oo lagu gudoonsiiyey
shaqaalaha ugu kartida iyo
shaqada badnaa Wasaaradda
Tamarta iyo Macdanta ayaa

ka qabsoontay xarunta
Wasaaradda ee magaaladda
Hargeysa 27.02.2021.

Xafladan ayaa ah mid sanadle
ah oo hadiyo jeer abaalmarino
lagu gudoonsiiyo shaqaalaha
u shaqada iyo kartida badan,
taasoo ka mid ah horumarinta
istaraatiijiyaddaha shaqada
iyo shaqaalaha, lana fulinayo
hab-raacyada iyo shuruucda
u dajisan Hay'adda
Shaqaalaha Dawladda.

Ugu horeyn waxa furitaankii
munaasabada hadal ka
jeediyey Agaasimaha
waaxda shaqaalaha ee

WT&M Axmed Maxamed
Cumar oo hadal kooban ka
jeediyay, ayaa faahfaahin
ka bixiyey qaabka lagu soo
xulay shaqaalaha lagu abaal-
mariyey shaqo-wanaagga
sanadlaha ah.

Agaasimaha waaxda
shaqaaluhu waxa uu sidoo
kale sheegay in xubnaha
la abaal-mariyey ay ka
kooban yihiin 15 Qof
“15-kaas qof, qof walba
agaasime waxeedkiisa ayaa
soo xulay kadib wasiirka
iyo agaasimaha guud iyo
gudi loo xilsaaray ayaa

qiimeeyay markaas ayaa la egaa imanshihiisa shaqo, Si cadaaladda oo qof jeclaysi aan ahayn ayaa loo qiimeeyaa waxaanan maanta aad ugu hambalyaynayaa dhaaman shaqaalaha kuwa aan gulaysanna waxaan leeyahay insha allah waxaan rajaynaa inaad sanadka danbe guulaysan doontaan”

Agaasimaha guud ee wasaaradda Tamarta iyo macdanta mudane Mukhtar Maxamed Cali, ayaa si qoto dheer uga waramay muhiimadda ay leedahay abaal-marinta shaqaalaha, waxaanu cadeeyey inay shaqaale weynaha Wasaaraddu dhamaantood yihiin dad xilkasnimo iyo shaqo-wanaagga leh

“waxaan qiraaya in shaqalaha ka hawlgala wasaaradani yihiin kuwa koobsadey hawlkanimo, dadaal iyo daacadnimo ,mana kala dhacaan aqoontooda, Kartidoodda iyo waayo aragnimadda ay u leeyihiin Qof waliba Waaxda uu jooggo”

Inta dadaashay waan u mahadcelinayaa inta kalana waxaan leeyahay guul baa inoo balanna”ayuu yidhi Agaasime Mukhtar Maxamed Cali.

Gudoomiyaha Komishanka maamul-wanaagga iyo la-dagaalanka Musuqmaasuqa Md. Dayib Xaaji Cali oo goob joog ka ahaa munaasibada ayaa dhankiisa bogaadiyey shaqaalaha muujiyey hawlkanimada, waxaanu intaasi ku daray “wasaaradda Tamarta iyo macdantu waxay ka mid tahay wasaaradaha halbowlaha u ah Qaranka, waxaan shaqaalaha iyo madaxda wasaarada u soo jeedinayaa inay u guntadaan sidii ay Qaranka uga haqabtirilaahayeen khayraadka dihin ee Dalka ku duugan”.

Wasiirka wasaaradda Tamarta iyo Macdanta oo uu markaasi ahaa Md. Jaamac X. Maxamuud Cigaal ayaa munaasibadan ka qiray deddaalka iyo firfircoonida shaqaalaha ka hawlgala wasaaradda.

Waxaanu yidhi “shaqalahani

waxay kaalin firfircoon ka qaateen hawsha socodsiinta iyo deddaalada loogu jiro ka faa’idaysiga Tamarta, Macdanta iyo shiidaal baadhista Dalka ka socota iyagoo ururiyey kaydiyayna dhamaan macluumaadka iyo xogaha ku saabsan arrimaha ay wasaaraddu Qaranka masuulka uga tahay.

Wasiirku waxa uu carabka ku adkeeyey inay guusha xubnaha la abaal-mariyey ay wada leeyihiin dhamaan shaqaale weynaha wasaarada Tamarta iyo macdanta somaliland.

Gudoomiyihii hore hay’adda Shaqaalaha Dawladda Md. Farxaan Aadan Haybe, ayaa dhankiisa weedho dhiiri galin ah u jediyay shaqalaha WT&M, waxaanu kula dardaarmay inay si hagar la’aan ah deddaalka u laba jibaaraan.

Ugu dambeyn waxa munaasibadaasi abaal-marinihii loogu talagalay lagu guddoonsiiyey 15 qof ee guulaysteyaasha ahaa sanadkii 2020-ka.





Tobabar Xirfadaha Hogaamineed



Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ay weheliyaan Agaasimaha Guud iyo Agaasimaha Waaxda Shaqaalaha ayaa

Tababar U Furay Madax qaybeedyadda Wasaaradda Kuwaas oo ka kala soday Waaxaha iyo Xafiisyada kala Duwan ee Wasaaradda.

Waxaa Saaka Tababar Xarunta Wasaaradda Looga Furay Madax-Qaybeedyadda Waaxaha iyo Xafiisyada Kala duwan ee Wasaaradda, Tababarkaas oo Socondoon Muddo Saddex Cisho ah ayaa Shaqaaluhu kubarar doonaan Kobcinta Xirfadaha Hogaamineed (Leadership Skills Development).

Tababarkan oo ay soo agaasintay Waaxda Cududda Shaqaalaha ee Wasaaradda ayaa Waxaa ugu horeyn Furitaankii Kulanka kelmado kooban kasoo jeediyey Agaasimaha Waaxda Cududda Shaqaalaha waxaanu Sharaxaad ka bixiyey ujeedka iyo muhiimada Tababarka, sidoo kalena, ku

booriyey shaqaalaha tababarka loo qabtay in ay sida ugu wanaagsan uga Faa'iidaystaan tababarka islamarkaana Ku dabaqaan Shaqo Maalmeedkooda.

dhankiisa waxaa isna madasha ka hadlay Macalinkii Tababarka bixinayey Macalin Cabdiraxmaan oo ka socday Mac-hadka Hasi Consultant waxaanu sharaxay waxyaabaha uu ka koobnaan doono tababarku iyo meelaha uu xooga saari doono.

Waxaa Isna hadlay Agaasimaha Wasaaradda oo ku dheeraaday muhiimadda uu tababarkani u leeyahay in la kobciyo shaqada wasaaradda.

Ugu danbayna Waxaa Tababarka si rasmiya u furay Wasiirka Wasaaradda Muddane Cabdilaahi Cabdi Faarax isagoo kula dardaaramay shaqaalaha ka qayb qaadanaya tababarka in ay weeleeyaan aqoonta ay ka korodhsan doonan tababarka islamarkaana ku dabaqaan shaqada xafiisyadooda.



MADAXDA IYO SHAQAALAHA WASAARADDA TAMARTA & MACDANTA OO KA SHIRAY DARDAR-GELINTA SHAQADA



Hargeysa(WT&M)-Xafiiska wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Jahmhuuriyadda Somaliland waxa ka qabsoomay mid kamida shirarka bille ah ee Wasaaradda 13/7/2021.

Shirka waxa guddoominaayey Wasiirkii hore ee Wasaaradda Md. Jaamac Xaaji Maxamuud Cigaal oo markaas xilka hayey, iyadoo uu ku wehelinayey Agaasimaha Guud Wasaaradda Mudane Mukhtar Maxamed Cali, waxana sidoo kale ka qaybgalay dhamaan agaasime-waaxeedyadda iyo saraakiisha kale ee wasaaradda.

Waxa shirkan lagaga arrinsanayey kor-u-qaadida adeegyada qaranka wasaaraddu u qaabilsantahay maamulka iyo horumarinta tamarta iyo khayraadka Macdanta.

Agaasimayaasha waaxyaha kala duwan ee wasaaraddu ka koobantahay oo kulanka ka hadlay ayaa ka war-bixiyeen shaqooyinkii u qabsoomay iyo qorshaha wax-qabad ee Lixda bilood ee soo socda. Agaasime-Waaxeedyadu waxay ku dheeraadeen ka war-bixinta shaqada waax-kasta hayso iyo inay lagama maarmaan tahay in dar-dar lagu wado shaqada.

Xubno kamida shaqaalaha WTM, ayaa

dhankooda ka dareen celiyey aragtida wanaagsan ee ay ka haystaan in laga-qayb geliyo ka aragti-dhiibashada horumarka & waxqabadka wasaaradda.

Agaasimaha guud Mudane Mukhtar Maxamed Cali ayaa ka war bixiyay muhiimmadda uu shirkani u leeyahay xog-wadaaga shaqaalaha, is dareen dhagaysiga, ra'yi uruurinta iyo ka war-bixinta shaqada waaxkasta, masuul-kasta iyo shaqaale-kasta uu u hayo wasaaradda iyo guud ahaan qaranka Somaliland.

Sidoo kale Agaasimaha Guud, wuxuu ku adkeeyey Agaasimayaasha Waaxaha kala duwan in ay dhaqan-geliyaan isla xisaabtan Masuuliyadeed si loo guto Shaqadda qaranka, Lana muujiyo Masuuliyad, Xilkasnimo iyo Xalaal miirasho.

Ugu dambayn Wasiirka Wasaaradda tamarta iyo macdanta Mudane Jaamac xaaji Maxamuud Cigaal ayaa dhiiri-galiyey guud ahaanba bah-weynta WTM. Sidoo kale Wasiirka ayaa shaqaalaha uga waramay kaalinta ay wasaaraddu dalka ugu jirto iyo sida shaqaale ahaana looga baahnayahay in ay dardargalin iyo hufnaan badan ku kordhiyaan shaqada.

DHIIRI-GELINTA GANACSATADA DAHABKA



Madaxda wasaaradda tamarta iyo macdanta JSL, waxa ay kulamo dhiirigelin ah u la yeesheen guddida ganacsatada dahabka dalka sanadkan gudihiisa.

ku duugan dalka

3. xoojinta nidaamka wada-shaqeyneed ee dahablayaasha iyo dhamaan wasaaraddaha xidhiidhka tooska ah la



kulankan waxa ka so qaybgaley xubno metalaayey iskaashatada Dahablayaasha, wasiirka wasaaradda Tamarta iyo Macdanta, Wasiirka wasaaradda horumarinta Maaliyadda, Agaasimaha Guud ee wasaaradda Tamarta iyo Macdanta, Agaasimaha Guud ee wasaaradda Ganacsiga, Dalxiiska iyo Warshadaha iyo Agaasimaha waaxda Macdanta, waxaanay ujeedaddiisu ahayd in layska kaashado qodobadan soo socda;

1. Taageeridda ganacsatada Dahabka
2. Ilaalinta iyo ka faa'idaysiga khayraadka



leh

4. Kobcinta iyo dhiiri-galinta ganacsatada dahabka

Dhamaan masuuliyiinta iyo ganacsatada dahabku waxa ay isla lafa-gureen in la xoojiyo xidhiidhka wada-shaqeyneed ka dhexeeya, ilaalinta khayraadka dalka iyo in la yareeyo caqabadaha ku gadaaman ganacsatada dahabka.

Dahabka waa isha labaad ee dhaqaalaha dalka kaas oo qayb laxaad leh ka qaata horumarinta dhaqaalaha iyo yaraynta faqriga.

WASIIRKA WASAARADDA TAMARTA & MACDANTA OO KAQAYB GALAY SHIRKA TODOBAADKA SHIDAALKA AFRIKA



Dubai(WT&M)-lib-geynta khayraadk Shidaalka iyo macdanta ku duugan Jamhuuriyadda Somaliland waa mid kamida qodobada udub-dhexaadka u ah siyaasadda iyo qorshaha Wasaaradda tamarta iyo

dhulka hoostiisa ku jirta, iyadoo ay sanadkan dedaallo la xidhiidha arrintaasi oo badan fulisay, gaar ahaan bilihii u dambeeyey.

Wefti uu hogaaminayo Wasiirka Wasaaradda



macdanta oo Qaranka u xilsaaran maamulka horumarinta ka-faa'idaysiga nimcadaha

Tamarta iyo Macdanta Jamhuuriyadda

Somaliland Cabdilaahi Cabdi Faarax ayaa qaybgalay shirka Africa Oil Week oo shirka ku soo bandhigay khayraadka shidaal ee Jamhuuriyada Somaliland iyo fursadaha



sannadkan lagu qabtay Magaalada Dubai ee dalka Imaaraadka Carabta horraantii bishii November.

Kulanka oo ahaa shirka ugu weyn ee Arimaha Shidaalka ee Afrika ayaa soconayay 4 maalmood (8-11 November), waxaana isugu yimi madaxda wasaaraddaha Tamarta iyo Shidaalka ee Afrika, shirkadaha Shidaalka, maalgashadayaasha caalamiga ah iyo



daneeyayaasha kale ee arimaha Shidaalka.

caadiyan shirka waxa lagu qaban jirey Magaalada Cape Town ee dalka Koonfur Afrika, waxaase labadii sannadood ee u dambeeyey sababo la xidhiidha Covid-19 darteed loo bedelay Dalka Imaraadka Carabta.

Wasiirka iyo weftigiisa oo ka koobnaa xubno agaasimayaal wasaaradda ah ayaa

ganacsi ee dhinca shidaalka.

Wasiirka ayaa sidoo kale kulamo la yeeshay shirkaddo shidaal oo danaynaya maalgashiga khayraadka shidaalka ee Soomaaliland. Wasiirku wuxuu sidoo kale ka qayb galay kulano lagaga doodayey laguna falaqaynayey mustaqbalka iyo maalgelinta khayraadka Shidaalka ee Afrika.

Wasiirka Wasaaradda tamarta iyo macdanta JSL Md. Cabdilaahi Cabdi Faarax, wuxuu sidoo kale halkaa kulamo kula qaatay shirkaddaha Shidaalka ee hadda ka hawlgala Somaliland sida RAK Gas, Genel Energy oo kulankaa ka soo qaybgalay iyo shirkada TGS oo Somaliland sahama shidaal ka samaysay, islamarkaana heshiis kula jirta dawladda.

Kulankan guud waxa garab-socday kulamo gaar-gaar ah oo uu wasiirku la yeeshay wasiirrada iyo madaxda kale ee waddamada Afrika, kuwaas oo daarnaa aqoon-is-weydaarsi la xidhiidha hawlaha shidaalka, guud ahaanba arimaha horumarinta bulsho ee qaaradda Afrika iyo sidii ay Somaliland isaga-kaashan lahaayeen.

Shirka, ayaa gabagaboobay Khamiistii 11 November sanadka 2021.

WAXQABADKA WAAXDA QORSHAYNTA WT&M EE 2021



• Xoojinta Hawlaha Qorshaynta ee WT&M

- **W**aaxdu waxay la wadaagtay dhammaan waaxyaha qaybinta Shaxanadda Qorshe-hawleedada waaxyaha iyo qaybaha Wasaaradda ee 2021.
- Waxaanu talo bixin siinay waaxyaha si ay u buuxiyaan shaxanada qorshe hawleedadda 2021
- Waxa la soo ururiyay isla markaana meel la iskugu keenay dhammaan Qorshayayaasha Waaxyaha WT&M oo laga sameeyay hal fay oo sannadka 2021ka ah.

Kormeerida, qiimaynta iyo dib u eegista qorshe- hawleedyada WT&M

- Waaxda Qorshaynta ee WT&M waxay soo ururisay waxqabadka

Waaxyaha wasaaradda ee lixdii bilood ee u horreeyay ee (Jan – June 2021), oo ay ka diyaarisay warbixin kooban, halka ay hadda wadaan Intii July – Dec 2021.

• Xidhiidhinta WT&M iyo Wasaaradda Qorshaynta iyo Harumarinta Qaranka

- Waaxdu waxay xaadirtay 4 kulan oo lagu qabtay WQ&HQ, oo loogu diyaar garoobayay Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Saddexaad
- Wasaaraddu waxay waaxda tamartka iska kaashadeen sidii loogu qaadan lahaa khabiir ka caawiya wasaaradda dhinaca QHQ III

Kobcinta iyo kor u qaadista
awooda xirfadeed ee
shaqaalaha Waaxda
Qorshaynta

- Waaxdu waxay soo qabanqaabisay hal tababar oo u gaar ah falanqaynta xogta (Data Analysis)
- Shaqaalaha Waaxdu waxay ka qayb galeen hal tababar oy soo qabanqaabisay WQ&HQ
- Shaqaalaha waaxdu waxay ka qayb galeen tababar la xidhiidha Hoggaaminta Toolmoon (Leadership) oo ay soo qabaqaabiyeen Waaxda Shaqaalaha ee WT&M

Unkidda Qaybta Tirakoobka ee WT&M statisticska

- Sannadkan 2021 waxa Waaxdu ku guulaysatay in qof loo magacaabo Qaybta Tirakoobka/Statistiska ee WT&M

- Soo ururinta dhamaan xogaha waaxaaha WT&M, gaar ahaan Macdanta ee Lixdii Bilood hore sannadkan
- Warbixin kooban oo laga sameeyay dhaqdhaqaaqa macdanta ee Wasaaradda ee Jan – June 2021

Taageeridda dhamaan munaasibadaha WT&M

- Waaxdu waxay ka qaybgashay qabanqaabada Shirka Macdanta iyo Shidaalka Somaliland.
- Sidoo kale, xubin waaxda ka tirsan ayaa ka qayb gashay Shirka Shidaalka Afrika (Africa Oil Week), oo ka dhacay dalka Imaaraatka Carabta.

WARBIXINTA WAAXDA MAAMULKA IYO MAALIYADDA



- **W**aaxda Maamulka iyo Maaliyadda ee Wasaaradda tamarta iyo macdanta JSL, waa halbowlaha shaqada ee waraabiya dhamaan awoodda iyo tacabka lagu fuliyo hawl-gallada joogtada ah ee ay wasaaradda, iyadoo taageerta guud ahaan waaxyaha kala duwan shaqada ay qabtaan.
- Maadaama ay tahay Waaxda Wadnaha u ah Wasaaradda, waxay ka kooban tahay lix qaybood oo shaqadu u qaybsan tahay;
 1. madax-qaybeedka Xisaabadka
 2. madax-qaybeedka kaydka xogta (Aarkeefiyada)
 3. madax-qaybeedka gaadiidka
 4. madax qaybeedka Iibka
 5. madax-qaybeedka maamulka ammarka, hawlaha guud iyo daryeelka beerta wasaaradda.
- Waaxda Maamulka iyo Maaliyaddu waxyaabaha ugu waaweyn ee ay sanadkan ku guulaysatay waxa kamida inay shaqaalaha qaybta Maaliyadda ku carbisay ku shaqaynta nidaamka casriga ah ee E-Governance ee loo raray hanaanka maaliyaddeed ee qaranka.
- Waxa kale oo ay waaxdu si joogto ah u kobcisaa aqoonta shaqaalaha maaliyadda iyo xisaabaadka si loola jaan-qaadsiiyo hadba isbedellada ku yimaada hab diyaarinta kharashaadka, Iibka iyo wixii lamida.
- Ugu dambeyn hufnaanta shaqo ee waaxdani mid ka muuqda quruxda Wasaaradda.

XOGTA WAAXDA XIDHIIDHKA DADWEYNAHA IYO SAXAAFADDA



• **W**aaxda xidhiidhka dadweynaha iyo Saxaafaddu waamuraayada laga dheehdo shaqada Wasaaradda tamarta iyo macdanta, maadaama ay shaqadeedu tahay isku-xidhka wasaaradda iyo bulshada, isla markaana u taagan tahay inay gaadhsiiso xogta waxqabadka iyo barmaamujyada war-gelineed dadweynaha.

• Shaqada waaxda waxa kale oo kamida duubista, diyaarinta, kaydinta iyo hagida wararka iyo barmaamujyada wasaaraddu qabato, waxaanay ka masuul tahay wada shaqaynta wasaaradda iyo warbaahinta kala duwan ee Dawladda iyo ta gaarka loo leeyahay.

Xafiiska xidhiidhka dadweynaha iyo Saxaafaddu waxa kale oo uu maamulaa warbaahinta Wasaaraddu gaarka u leedahay, sida;

1. Baraha bulshada (Facebook, Twitter iyo kuwa la hal maala) oo aanu ku

baahino wararka iyo barmaamujyada wasaaraddu qabato, iyagoo isugu jira qoraal, sawirro iyo muuqaalo intaba.

2. Sidoo kale Website Wasaaradda

3. Xafiiskani waxa uu sidoo kale sanadkii soo saaraa majalad Xog-side oo ka warama waxqabadka wasaaradda, kaasoo Afartii biloodba mar soo baxa, isla markaana si waafi ah ugu soo bandhigno mowduucyo ku saabsan guulaha iyo horumarka wasaaradda.

sannad walba laba jeer waxa uu Xafiisku diyaariyaa farrimo wacyigelin ah oo maqal iyo muuqaal ah, kuwaasoo bulshada lagu gaadhsiiyo hababka ka faa'iidaysiga noocyada tamarta, fursadaha maalgelinta macdanta iyo deddaallada sahaminta iyo soo-saarida Shidaalka.

Xafiisku waxa kale oo uu qabanqaabiyaa, isku-duba ridaa, isla markaana qabtaa dood-cilmiyeedyo ay wada yeeshaan madaxda Wasaaradda iyo bahda Jaamacaddaha dalka.

waxaanan jaamacadda Hargeysa la wadaagnay dood ay diyaarisay Waaxda tamarta, taasoo ku saabsanayd waxyaabaha keena gubashada ka dhalata korantada, ka faa'adaysiga ilaha tamarta iyo khasaaraha ka dhasha.

Dood-cilmiyeedyadan waxa ka qayb-qaata, masuuliyiinta iyo khubarrada Wasaaradda iyo Ardayda Jaamacaddaha, maamulkooda iyo waliba macalimiinta, waxaana looga gol leeyahay inay aqoonyahanka dalku qayb ka noqdaan shaqada muhiimka ah ee ay wasaaraddu qaranka u hayso.

HESHIISKA SHIDAAAL QODISTA SOMALILAND



Heshiiska Shidaal qodista Somaliland ee Shirkaddaha Genel Energy iyo Opic Somaliland Corporation (OSC) Shirkaddaha Opic Somaliland Corporation iyo Genel Energy ayaa wada gaadhay heshiis iskaashi oo la xidhiidha soo-saarida shidaalka Somaliland. Shirkadda Genel Energy oo muddo sannado ah ku sugnayd Somaliland ayaa samaysay sahamin shidaal oo kala duwan oo baaxad leh.

Sahankaas oo isugu jiray noocyada jijoologiga, baadhitaano ay diyaaraddo fuliyeen (gravity, magnetic), siesmic (hilar gariir oo dhulka gudahiisa humaag ka muujiya), (baadhitaan caro-ceel), waxa midba midka ka dambeeya u gogol xadhayey, isla markaana marba marka ka dambeeya soo koobayey baaxadda goobaha tuhunka Shidaalku ka muuqday. Shirkaddu ka dib markii ay sifayn iyo turjumaad ku samaysay xogahaas, isla markaana si wadajir ah lafagurid ugu

samaysay xogaha noocyada kala duwan ah ee ay heshay, waxay xaqiijisay goobo dhawr ah oo muujinaya hannaan qaab-dhismeed (structures) oo ay ku jiri karaan kayd shidaal oo baaxad leh, waxaanay goobahaas u aqoonsatay inay yihiin kayd shidaal oo mudan in la qodi karo (drillable prospects). Si kaydadda loo qodo, loogana midho dhaliyo khayraadka ku duuggan shirkadu waxay in muddo ah ku hawlanaayd sidii ay u heli lahayd daneeyayaal kale oo ay iskubiiraan (partner) si ay u wada wajaahan hawlaha miisaanka leh ee qodaalka shidaalka, taas oo ah arrin ay inta badan sameeyaan shirkadduhu marka ay ceelal ka qodayaan meelo aan hore shidaal looga soo saarin (frontier areas).

Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Jamhuuriyadda Somaliland iyo Genel Energy ayaa deddaal badan ka dib ku qanciyeey shirkadda CPC ee laga leeyahay dalka Taiwan inay isku biiraan iyada iyo Genel Energy si loo dardargeliyo geedi-socodka hawlaha

shidaalka ee dalka, waxaanay Shirkadda CPC aasaastay shirkad Opic Somaliland Corporation (OSC) oo ah faraceeda ka hawlgelaya Somaliland taas oo saami dhan 49% ka iibsatey shirkadda Genel Energy, si ay qayb uga noqoto heshiiska Genel Energy kula jirto dawladda Somaliland ee xidhmooyinka shidaalka (oil blocks) SL10B iyo SL13. Heshiiska labada shirkaddood, oo ay wasaaradda tamarta iyo macdanta ku lahayd door ansixineed ayaa la kala saxeexday maalintii Arbacada ee 15-kii bishan Diseembar 2021.

Genel Energy ayaa yeellanaysa saami qaybeed dhan 51% xidhmooyinka lagu heshiyey, ka dib markii ay ka iibisay Opic Somaliland Corporation (OSC) 49%.



Agaasimaha farsamada ee Shirkadda Genel Energy Mike Adams ayaa sheegay “Somaliland waa gobol aad loo saadaalinayo oo aan si weyn loo sahamin khayraadkiisa oo leh astaamo soo jiidasho leh oo ku saabsan qodista ceelalsha Shidaalka” ayuu u sheegay energyvoice talaadadii todobaadkan. Wasaaradda oo ka duulaysa cilaqaadka iskaashi ee Somaliland iyo Taiwan iyo doorka wasaaradda kaga aadan, ayaa xidhiidh toos ah la samaysay shirkadda CPC bishii Diseembar ee sanadkii 2020. Xidhiidhkan waxaa ka dhalatay in shirkadda CPC booqasho ku timaado Somaliland bishii Maarso ee 2021, si ay ula kulanto wasaaradda iyo shirkadaha Shidaalka ee dalka ka hawlgala isla markaana ugu kuur-galaan fursadaha maalgashi ee xagga Shidaalka ee ka jira waddanka.

CPC, ayaa aad ugu qanacday tuhunka shidaal ee Somaliland, gaar ahaana natiijooyinka toganee ka soobaxaysa sahamadii ay sameeyeen shirkadaha Genel Energy iyo RAK Gas, waxaanay muujiyeen inay danaynayaan inay qayb ka noqdaan mashruucan. Xukuumadda Somaliland oo tan iyo markii ay bilowday barmaamujka sahaminta shidaalka guntiga u xidhnayd sidii looga gaadhi lahaa guul, ayaa dedaal gelisey bilihii u dambeeyey sidii ay u fuddudayn lahayd midowga labada shirkaddood Genel iyo OSC, iyada oo geesta kalena soo dhawaysay heshiiska labada geesoodka ah “waa talaabo kale oo hore loo qaaday, taas oo ay dawladda Somaliland u aragto guul weyn oo muujinaysa in lagu sii dhawaado ka faa’idaysiga tacabkii la geliyey mashruucan. Wasaaradda tamarta iyo macdanta oo ay si toosa u khusayso hawshani, waxa ka go’an inay mar walba hagaajiso doorka kaga aaddan shaqada” sidaasi ayuu yidhi agaasimaha waaxda Shidaalka ee wasaaradda tamarta iyo macdanta ee Jamhuuriyadda Somaliland... Shirkadda Opic Somaliland Corporation ee faraca ka ah CPC ayaa sidoo kale iska diiwaangelisey Somaliland si ay ugu gogol-xaadho si ay xidhmooyin kale oo shidaal u maalgashato mustaqbalka. Arintan oo ay aad ugala shaqaysay Wasaaradda Tamarta iyo Macdantu ayaa faa’iidouyeelandoonta labada dal, maadaama dalka Taiwan aanu lahayn shidaal ku filan baahidooda xagga tamarta. Shirkadda CPC oo ah tan ugu weyn ee dalka Taiwan u qaabilsan arrimaha shidaalka ayaa hadafka jiritaankeedu uu yahay sidii ay shidaal ay dalka (Taiwan) dibaddiisa ka keento uga haqabtiri lahayd dalkaasi, waxaanay hadda ka hawlgashaa waddamo badan oo caalamka ah sida USA, Ecuador, Niger, Chad, Malaysia, Australia iyo Somaliland oo hadda shaqada ka bilowday.

CIYAARTOYADDA KUBADDA CAGTA EE WASAARADDA TAMARTA IYO MACDANTA



Ciyaartooyadda Kubadda Kolaygga Ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta



